

# Duubabka Bivalent Booster oo u bilaabmaya 18 jir iyo ka weeyn

Seteember 14, 2022 [weeyddiimaha war baahinta](#)

Laga bilaabo Seteembar 21, ballamaha tallaalka xoojinta COVID-19 ee laba-geesoodka ah waa la ballansan karaa, iyada oo maamulka tallaalku sidoo kale bilaabmayo Seteember 21.

Ka dib dib u eegis cilmiyaysan oo dhamaystiran oo madax banaan, Caafimaadka Canada waxa ay ansixisay tallaalka Moderna Spikevax Bivalent COVID-19 oo qiyaas xoojin ah oo dadka Albeerta ee u qalma oo 18 sano iyo ka weeyn.

Tallaalka laba-geesoodka ah ee COVID-19 wuxuu kiciyaa jawaab celin difaac adag wuxuuna bixiyaa difaac dheeraad ah labadaba Omicron iyo nooca fayraska SARS-CoV-2 ee asalka ah.

Dadka reer Alberta ee dhammaystay taxanayaasha aasaasiga ah waxay xaq u leeyihiin tallaalka bivalent. Muddada lagu taliyey ee u dhaxaysa qiyaasaha waa ugu yaraan shan bilood marka loo eego qiyaasihii u dambeeyay ama jeermiskii hore.

Muddada gaaban ee saddexda bilood ah ayaa loo tixgelin karaa (shaqsiyaadka khatarta sare ugu jira natiijooyinka ba'an, tusaale ahaan), laakiin muddada dheer ee u dhaxaysa qiyaasuhu waxay keentaa jawaab celin ka wanaagsan oo ka hortagga caabuqa COVID-19 oo la filayo inuu sii dheeraado.

## U qalmidda Tallaalka

Laga bilaabo Seteembar 21, deganayaasha Alberta 18 sano iyo ka weyn ee u qalma tallaalka bivalent waxaa ku jiri doona:

- Dadka dhammaystay taxane kasta oo aasaasi ah, oo ay ku jiraan isku dhafka tallaallada AstraZeneca, Pfizer iyo Moderna, oo haysta ugu yaraan shan bilood oo kala fogaansha ah tan iyo qiyaasti ugu dambaysay ama caabuqii ugu dambeeyay.
- Shakhsiyaadka helay tiro kasta oo ka mid ah dhiirrigeliyeyaashii hore oo haysta ugu yaraan shan bilood oo kala fogaansha ah ilaa qiyaasti u dambaysay ama caabuqii ugu dambeeyay.

Tallaalka laba-geesoodka ah ee COVID-19 ayaa la filayaa in loo helo dadka Reer Alberta oo da'doodu tahay 12- 17 sano dhammaadka Seteembar/horraanta Oktoobar.

Intaa waxaa dheer, laga bilaabo asbuuca Oktoobar 3, xoojinta bivalent waxaa la siin doonaa deganayaasha waayeelka ah ee ku urursan xarumaha daryeelka, oo ay weheliso tallaalka hargabka.

## **Qabsashada ballanta tallaalka**

Tallaallada waxaa laga heli doonaa farmashiyeyaasha ka qayb qaadanaya iyo rugaha caafimaadka beesha, doorana goobaha AHS. Ballansashada waxaa laga heli doonaa Nidaamka Ballamaha Tallaalka Alberta [alberta.ca/vaccine](https://alberta.ca/vaccine) ama adigoo wacaya Health Link 811. Ballamaha muddada gaaban ee ugu yaraan saddex bilood ah laguma ballansan karo onlayn.

Farmashiyeyaasha qaarkood way ku qaabili karaan ballan la'aan. Haddii farmashiyaha deegaankaagu aanu ku jirin liiska nidaamka ballansashada, si toos ah ula xidhiidh ama booqo [bluecross.ca](https://bluecross.ca) si aad u heshid farmashiga kuugu dhow.

Shakhsiyaadka ku nool Deegaanka Qowmiyadaha Koowaad waxay ka heli karaan qiyaasaha xarumaha kalkaalinta ama xarumaha caafimaadka dadweynaha ee deegaanadooda.

## **Macluumaad la xiriira**

- [COVID-19 tallaallada iyo macluumaadka diiwaanada](#)
- [Macluumaad AHS ee ku saabsan ballansashada tallaalka](#)